



Abaalmarinada & Isa sharfidda: Kooxda qalabka iswada ‘robotics’ ee Cleveland oo si aad ah uga dhex muuqday dunidda; waxyaabo dheeraad ah

Pigmice, oo ah kooxda qalabka iswada ‘robotics’ oo ka kooban 16 arday oo ka socota Dugsiga Sare ee Cleveland iyo hal ka socdo Franklin, ayaa dhammeystay sanadkoodii ugu guulaha badnaa iyada wax soo bandhigid xoogan ka muujiyay Horyaalka Robotics ee FIRST, oo sidoo kale loo yaqaan dunidda “worlds,” oo ka dhacay Houston, Texas.

Kooxdu waxay kaalinta 21^{-aad}ka gashay iyada oo ka soo dhex baxday 66 kooxood marka la eego qaybteedii ciyaaraha isreebreebka ka dib markii ay keeneen 5-5, waxaana loo doortay in ay ka qayb qaataan ciyaaraha dheeraadka ah ee iyaga oo qayb ka ah isbahaysiga “alliance” oo dhan afar-kooxood. Isbahaysiga “alliance” wuxuu ku guuleystay dhammaan afartiisii isreebreeb ‘quarterfinals’ iyo semifinal-ka ka hor intii aanu ku guuldareysan ciyaarihii kama dambeysta ahaa.

Dadaalka Houston wuxuu soo gunaanaday Pigmice – kaasi oo 2004 ku bilawday isaga ah Kooxda Horyaalka FIRST LEGO -- ay Horyaalka Degmada ee PNW u soo baxeen markii labaad isla markaana kaalinta 26^{-aad}galay iyada oo ka soo dhex baxday 64 kooxood.

Kooxaha ka socday Cleveland waxay kala ahaayeen ardayda sanadkii u dambeeyay dhigata ee Dexter Carpenter, Colin Hale-Brown, Franklin Harding, Nathan Jesudason iyo Hunter Key; ardayda sanadkii saddexaad dhigata ee Brendan Burkhart, Orion Capell, Henry McCreery, Kai Morita-Mcvey iyo Tucker Ramsey; ardayda sanadkii labaad dhigata ee Milo Beall, Josiah Chan, Jennifer Kuchar iyo Marcus Polk; iyo ardayda sanadkii u horreeyay dhigata ee Jago Dorn iyo Victor Huynh. Ardayga sanadkii u dambeeyay dhigata Franklin ee Caleb Eby ayaa sidoo kale ku jiray kooxda. Cynthia Carrell, JJ Heldmann iyo Sarah Jesudason ayaa ahaa dadkii korka kala socday ‘chaperones’.

[Fiiri warbixinta buuxda ee safarkii kooxdu ku aaday Houston iyo xilliga.](#)

Suxufiyiinta Lincoln journalists oo ku guuleystay tartankii su’aalaha kediska: Koox ka socota Dugsiga Sare ee Lincoln ayaa ku guuleysatay National Journalism Quiz Bowl ee dhawaan ka dhacay Anaheim, Calif. Tartanka waxaa lagu tijaabiyay aqoonta tartamayaasha u leeyihiin waxyaabaha hadda dhacaya, sharciga warbaahinta iyo erayada muhiimka ah, iyo dhanka madaniga ah, wuxuuna qayb ka ahaa Kulankii Suxufinimada Dugsiga Sare ee Qaranka ee Gu’ga.

Xubnaha kooxda ee Lincoln ayaa shaqooyin kala duwan ka haya daabacaadaha dugsiga. Ardayada sanadkii u dambeeyay dhigata ee Darina Miroedova ayaa ah tafaitiraha guud ee buug-sanadeedka. Ardayga sanadkii saddexaad dhigata ee Evan Reynolds ayaa ah tafaitiraha muuqaalada ee Cardinal Times, oo ah wargeyska ardayda ee dugsiga. Ardayada sanadkii saddexaad dhigata ee Samantha Howard ayaa ah agaasimaha sawir-qaadista ee wargeyska Beyond the Flock. Iyada oo ardayga sanadkii saddexaad dhigata ee Evan Reynolds uu yahay tafaitiraha muuqaalada ee wargeyska Times.

Ardayda oo lagu aqoonsaday kulankii hoggaamineed: Dhowr arday oo ka tirsan PPS ayaa lagu aqoonsaday Kulankii Hoggaamineed ee César E. Chávez ee dhawaan ka dhacay Western Oregon University ee ku taala Monmouth. Ardayada sanadkii u dambeeyay dhigata Roosevelt ee Darina Miroedova ayaa ku guuleysatay Abaalmarinta Hoggaaminta Wanaagsan iyada oo door muhiim ah ka ciyaartay maamulida kulanka, taasi oo soo jiidatay in ka badan 1,900 arday, oo ay ku jiraan 250 ka socotay PPS.

Ardayga ka tirsan Dugsiga Sare Franklin ee Monserrat Juarez Cervantes ayaa deeq waxbarasho oo dhan \$1,000 ka helay Western Oregon. Ardayada ka tirsan Cleveland ee Heavenly Escobar-Meza ayaa heshay magacaabista sharafta leh ee gelitaankeedii tartanka gabayga.

Dhacdada ayaa lagu soo bandhigay maalin la qabanayo aqoon isweydaarsi dhanka waxbarashada iyo dhaqanka ah, booqashooyin lala leeyahay wakiilada kulliyadda, iyo tababar dhanka hoggaaminta ah oo ay bixiyeen dadka meesha ka hadlay iyo macallimiin qaran ahaan la aqoonsan yahay.

[Fiiri sawirro buuxa oo ka socda dhacdada](#)